

- In badan oo ka mid ah dadka guryaha gatay oo looga iibiyay in ay helayaan milkiyad kadibna ay soo baxday in aanay heli karin qaanuun ahaan. Tani waxayna keentay aamin bax ayaga iyo shirkadda SOMGULF, sidoo kalena waa qadiyad keeni karta dacwad joogta ah oo ku timaada mashruucan.
- Khatar joogta ah oo ka imaan karta mashaariicda kale ee SOMGULF ee aan hirgalin maadaama ay milkiyadda gurigan ku qoran yihiin xubnaha SOMGULF.
- In badan oo ka mid ah dadka guryaha ka iibsaday mashruucan SOMGULF GMC Towers oo dhibaato lagala kulmo maamulkooda & maarayntooda.

2. **Al Zahour:** waa dhisme weyn oo ay shirkaddu dhismihiisa ka bilowday Xaafadda Al Nahda ee Sharjah, UAE sannadkii 2006, Plot Numaber 122, istaagayna July 2009 isaga oo maraya 7.5 dabaq oo u dhiganta 25% intii la dhisi lahaa.

**Xaaladda Guriga:**

- Gurigan ma dhamaystirna oo waxaa ka dhiman 75% intii loo qorsheeyey.
- Waxaa rahan loogu dhigay deyn uu ku lahaa SOMGULF nin Sucuudi ah.
- Waxaa milkiyadda guriga ku qoran nin ka tirsan qosyka xukuma Sharjah ee kuma qorna SOMGULF.
- Waxaa kale oo jira dad laga iibiyay oo kor u dhaafaya 30 qof oo bixiyay qeybo ka mid ah lacagtii.
- Waxaa jira heshiis lagu iibiyay gurigan oo aan weli dhamaystirmin, haddii uu hirgalana bixin doona xuquuqda dadkii wax ku lahaa.

3. **Mashaariicda Emirates City ee Cajman,** oo ah 3 Mashruuc, kalana ah:

- SOMGULF 2, Plot C16.
- Venice One, Plot B18.
- Venice Two, Plot A10.

**Xaaladda Guryahan:**

- Waxay guryahan boos ahaan ku yaallaan meel ka baxsan magaalada Cajmaan.
- Laba ka mid ah waxaa la dhisay aasaaskii, halka midka kale aan wali waxba laga qaban.
- Dhismaha guryahan wuu taagan yahay laga soo billaabo 2009 oo ah waqtigii uu ka dhacay wadankan burburkii dhaqaale.
- Waxaa mashruuca aan wali waxba laga bilaabin lagu leeyahay lacag dhan 8.5 Milyan oo Dirham Imaaraat ah.
- Waxaa jira dad laga iibiyay guryahaas oo bixiyay qeybo ka mid ah lacagtii oo ah sidan:
  - Dhismaha SOMGULF 2 Plot. C16: Waxaa laga iibiyay dad ilaa 230 qof ah.
  - Dhismaha Venice One, Plot. B18: Waxaa laga iibiyay dad ilaa 325 qof ah.
  - Dhismaha Venice Two Plot. A10: Waxaa laga iibiyay dad ilaa 20 qof ah.
- Dadkaas waxaa qeyb ka mid ah ka iibiyay Mu'asasad uu leeyahay Sheekha Cajmaan, halka qeyb kale ay ka iibiyeen SOMGULF.
- Waa mashaariic ay ka imaan karto dadka laga iibiyay dacwado saamayn ku yeelan kara mashaariicda SOMGULF oo dhan.

*[Signature]*  
12/12/2014

*[Signature]*  
12/12/2014

*[Signature]*  
12-12-2014